Social Research Centre

# Xaashida Macluumaadka Ka qaybgalaha

# Xograadinta Kireystaha Guriyeynta Dadweynaha Fiktooriya 2025

Xaashidaan Macluumaadkan wuxuu kuu sheegayaa wax ku saabsan cilmi baarista mashruuca wuxuuna sharxayaa waxa micnaheedu yahay haddii aad doorato inaad ka qaybgashid.

## Maxay ku saabsan tahay cilmi baaristaani?

### Xograadinta Kireystaha Guriyeynta Dadweynaha wax ku saabsanr

Xograadinta Kireystaha Guriyeynta Dadweynaha waa xograadinta ugu ballaaran ee kireystayaasha guriyeynta dadweynaha ee gobol kaliya ee Australia. Waxaa sidoo kale la qabtay 2022, 2020, iyo 2019, oo wax ka badan ka qaybgalayaal ka badan 9,000 wadar ahaan.

Homes Victoria waxaa ka go'an dhageysiga kireystayaasha. Xograadintu waxay bixisaa macluumaad si uu u hagaajiyo adeegyada guriyeynta dadweynaha iyo inay si ka fiican u fuliyaan baahida dadka ku nool guriyeynta dadweynaha.

Xograadintu waxay siisaa kireystayaasha degan guryaha dadweynaha fursad ay wax uga yiraahdaan ku saabsan gurigooda iyo adeegyada guriyeynta.

Xograadinta waxaa ku jiri doona qiyaastii 3,500 kireyste oo da'doodu tahay 18 iyo ka weyn oo ku nool guryaha dadweynaha ee Victoria oo dhan. Koox teel teel ah oo kireystayaal ah ayaa lala xiriiri doonaa si ay uga qaybgalaan iyadoo ku saleysan da', jinsi iyo gooba.

## Maxaa ku lug leh?

Xograadintaan waa inay qaadataa qiyaastii 15 daqiiqo in la dhammeeyaa. Waxaad ku buuxin kartaa xograadinta online adoo raacaya link -iga lagugu siiyey martiqaadkaaga. Waxaad sidoo kale ku buuxin kartaa adoo adeegsanaya wareysi taleefan.

Xograadinta waxay ku weydiin doontaa:

- Ka haboonaanta iyo deganaanshaha guriyeyntaada
- Sidaan ugu dareemeysid ammaan iyo nabadgelyo bulshadaada dhexdeeda
- Ku lug yeelashadaada iyo ku xirnaanta bulshada aad ku dhexnooshahay

Xograadintu ma aha si lagu codsado dayactirka gurigeyga ama ka raadi nooc kale oo caawimaad ah Homes Victoria.

Haddii aad uga baahan tahay caawimaad Homes Victoria, waxaad ugala xiriiri kartaa si toos ah 13 11 72 ama booqo https://www.dffh.vic.gov.au/contact-us.

### Wax ku saabsan ka qaybqaadashada xograadinta

**Ka qaybqaadashadu waa ikhtiyaari,** tan micnaheedu waxaa weeye:

- Kuma khasbanid inaad buuxisid xograadintaan
- Waa joojin kartaa xograadinta wakhti kasta sabab kasta
- Waxaad dooran kartaa inaadan ka jawaabin su'aashii aad rabto

- Waxaad dooran kartaa inaadan ka qaybqaadan xograadintaan ka dib markii aad dhammeyso xograadinta. Waxaad u baahan doontaa inaad nagula soo xiriiri kartaa 31 Diiseembar 2025 iimeyl ama taleefan haddii aad dooneysid in la tirtiro jawaabahaaga. (rentersurvey@srcentre.com.au / 1800 023 040)

Go’ aankaaga ah inaad ka qaybqaadatid waa **midaan lagu garin**.

- Homes Victoria ma ogaan doonaan ciddii ka qaybgashay xograadintaan.
- Macluumaadkaaga shakhsiyeed waxaa laga saari doonaa ka hor natiijada xograadinta intaan la siin Homes Victoria.
- Ka qaybgalkeedu sinaba uma saameyn doono guriyeynta iyo adeegyada bulshada ee aad hesho.

Natiijooyinka xograadinta 2025 waxaa lagu daabici doonaa website ka Homes Victoria website. Lama daabici doono wax natiijo shakhiyeed ah.

**Xograadintu waa qarsoodi**. YourJawaabahaagu waxay noqon doonaan kuwo aan la garan sida waafaqsan Qorshaha Arimaha gaarka ah ee DFFH. Xarunta Cilmi baarista Bulshada waxay ururindoontaa jawaabaha xograadinta.

Wixii ah macluumaad intaa ka sii badan oo faahfaahsan oo ku saabsan ilaalinta arimahaaga gaarka ah iyo sida macluumaadka loo isticmaali doono waxaa lagugu siinayaa hoos.

## Yaa sameynaya cilmi baaristan?

Xarunata Cilmi baarista Bulshada waxay sameynaysaa xograadin iyadoo metelaysa Homes Victoria.

Xarunta Cilmi baarista Bulshada waa urur Cilmi baariseed Bulsho oo Madax bannaan oo ay leedahay Jaamacadda Qaranka Australiya. Waxaad ka ogaan kartaa wax badan oo nagu saabsan halkan: www.srcentre.com.au.

## Maxaa lay weydiiyey inaan ka qaybgalo mashruucan?

Waxaa lagugu martiqaaday inaad ka qaybqaadatid cilmibaaristaan sababtoo ah waxaad ku nooshahay guryaha dadweynaha ee ay bixisay Homes Victoria. Waa doorashadaada haddii aad ka qaybqaadatid xograadinta ama aadan ka qaybqaadan.

Haddii aadan dooneynin inaad ka qaybqaadatid:

- Uma baahnid inaad wax sameysid – iska ilow wixii xasuusin ah ee aan kuu soo dirno.
- Haddii aadan doonaynin inaan kuu soo dirno xasuusino, waxaad nagala soo xiriiri kartaa rentersurvey@srcentre.com.au, ama wac 1800 023 040 oo magacaaga waxaa lagu dari doonaa liiska ‘ha ila soo xiriirin’ ee 2025,2026 iyo 2027.

## Ka qaybqaadashada ma lacag baa laysiin doonaa?

Haa – waxaad heli doontaa kaar hadiyad ah oo $10 ah markaad dhammeysid xograadinta mahadsanid ahaan ka qaybqaadashadaada cilmi baaristaan.

Waa hagaag inaad ka booqo su’aalo yar haddii aadan dooneynin inaad ka jawaabtid. Weli xaq baad u leedahay foojarka hadiyada ah markaad dhammeysitd xog raadinta.

Waxaa lagu weydiin doonaa sidaad doorbideysid inaad ku heshid kaarkaaga hadiyada ah. Waxaan doorbideynaa inaan ku soo dirno foojar e-gift ah oo iimeyl ah si loo beekhaamiyo waraaqaha, wakhti,

wakhtiga iyo kharashaadka boosta. Waxaad sidoo kale ku heli kartaa kaarka hadiyada ah boosta haddii aadan isticmaalin iimeyl.

## Ka waran arimahayga gaarka ah?

Macluumaadkaaga gaarka ah waxaa ilaalinaya Qorhshah Arimaha gaarka ah ee DFFH .

Dhammaan macluumaadka aad bixiso waa **qarsoodi** waxaana loo isticmaalayaa oo kaliya mashruucan cilmi baarista ah.

- Magacaaga iyo faahfaahintaada shakhsiyeed lalama wadaagi doono cid ka baxsan kooxda cilmi baarista.
- Jawaabahaaga xograadinta waxaa si ka baxsan looga kaydinayaa magacaaga iyo faahfaahintaada shakhsiyeed.
- Haddii aad dooratid inaad ka baxdid xograadinta, waxaa lagugu dari doonaa liiska ‘ha ila soo xiriirin’ ee 2025,2026 iyo 2027.

Macluumaadka loo isticmaalay warbixinta waxaa laga dhigi doonaa mid aan **la aqoonsan**

- Tan micnaheedu waa magacaaga iyo wixii macluumaad ah ee adiga kuu gaar ah lama isticmaali doono.
- Dhammaan jawaabaha xograadinta waa laysku darayaa waxaana loo baarayaa isku jirkooda koox ahaan.
- Macluumaadka xograadinta waa la hubin doonaa si loo hubiyo jawaabuhu inaysan lahayn macluumaad lagu aqoonsado.

Xarunta Cilmi baaristu waxay ku:

- Keydin doontaa macluumaadkaaga faylal afgarasho lagu ilaaliyey oo helitaankoodu xaddidan yahay.
- Baabiinta dhammaan macluumaadka shakhsiyeed ee la xiriira mashruuca 30 maalmood gudahood markuu mashruucu dhammaado.

Xarunta Cilmi baarista waxay si buuxda u raacdaa Xeerarka Arimaha gaarka ah ee Australiya iyo dhammaan shuruucda arimaha gaarka ah ee khuseeya.

Qorshaha Arimaha gaarka ah ee Xarunta Cilmi baarista Bulshada waxaa laga helayaa srcentre.com.au/privacy oo sharxaya;

- Sidaan ku xafidno macluumaadkaaga
- Sidii aad u sameyn lahayd cabashada la xiriirta arimaha gaarka ah
- Sidaad u heshid oo aad u saxdid macluumaadkaaga
- Xaaladaha guud sida waafaqsan macluumaadkaaga waxaa laga yaabaa in lala wadaago kuwa dibeda ee helaya.

## Macluumaadkee ayaa la ururinayaa?

Homes Victoria waxay bixisay faahfaahinta xiriirka si ay kuugu martiqaadaan ka qaybgalka cilmibaaristaan. Tan waxaa ku jira magacaaga, cinwaankaaga, taleefankaaga gacanta, iyo iimeyl iyo macluumaadka kale sida jinsigaaga si ay nooga caawiyaan inaan si teel teel ah uga doorano dadka ka soo jeedo kooxo kala duwan.

Waxaa lagu weydiin doonaa su'aalo ku saabsan gurigaaga iyo adeegyada guriga. Xograadinta waxay sidoo kale xaqiijinaysaa faahfaahinta xiriirkaaga si kaarka hadiyada ah ee $10 si toos ah laguugu soo diri karo.

Waxaa laga yaabaa ama lagama yaabo in lagu soo waco si aad uga qaybqaadatid mustaqbalka xograadinahaan.

## Miyey jiraan wax khatara ahi?

Ammaankaagu aad ayuu muhiim noogu yahay anaga. Khataraha ku lugta leh cilmi baaristaan aad ayey u hooseeyaan guud ahaana waxay la xiriiraan wakhtiga ay qaadato in xograadinta la sameeyo.

Haddii, inta lagu jiro xograadinta,uu ogaado cilmi baaruhu wax ku saabsan khatar kugu soo socota adiga ama qof kale , waa inay u sheegaan qof kaa caawin kara. Uma baahna ogolaanshahaaga si ay tan u sameeyaan, laakiinse way kuu sheegayaan haddii ay u baahan yihiin inay la xiriiraan wax ka mid ah adeegyada taageerada iyagoo ku metelaya.

## Weydiimaha iyo saluuga

Haddii aad qabto wax weydiimo ama saluug ah oo ku saabsan cilmi baarista, ama haddii aad qabto wax cabashooyin ah oo ku saabsan dhinac kasta oo mashruucan ah ama sida loo qabtay, fadlan la xiriir rentersurvey@srcentre.com.au, ama ka wac 1800 023 040. Dhammaan cabashooyinka waxaa loola dhaqmi doonaa si qarsoon. Faahfaahintaadana waxaa loo hayn doonaa si gaar ah.

Mashruucan wuxuu leeyahay ogolaanshaha Guddiga Anshaxa Cilmi baarista Bani'aadamka( HREC) ee Wasaaradda Caafimaadka iyo Wasaaradda Guriyeynta, Sinnaanta iyo Qoysaska (ERM118706: 23/09/2025) ee lagala xiriiri karo research.ethics@health.vic.gov.au

# Foomka ka Raali ahaanshaha ka Qaybgalaha

| | |
|---|---|
| **Cinwaanka** | Xograadinta Kireystaha Guriyeynta Dadweynaha Fiktooriya 2025 |
| **Kafaala qaadka Mashruuca** | Homes Victoria |
| **Maareeyaha Mashruuca** | Simran Kothiyal, Maareeyaha Mashruuca, Xarunata Cilmi baarista Bulshada |

---

**Caddeynta ka Qaybgalaha**

Waxaan akhriyey Warqada Macluumaadka ka Qaybgalayaasha ama waxaa lay sharxay Warqada Macluumaadka.

Waxaan fahamsa nahay ujeedooyinka, nidaamka iyo khataraha cilmi baarista ee lagu sharxay mashruuca.

Waxaan helay fursado aan su'aalo ku weydiin karay, waana ku qanacsan ahay jawaabaha aan helay.

Waxaan si xor ah u ogolahay ka qaybgalka cilmi baaristaan sida la sharxay.

Waxaan fahansa nahay inaan ka noqon karo cilmi baarista anoon u baahan inaan bixiyo sabab wakhti kasta ilaa iyo dhammaadka hagaajinta macluumaadka (ee 31 Diiseembar 2025).

Waxaan heli doonaa kaarka hadiyada ah ee $10 dhammeystirkayga cilmi baaristaan.

Waxaan fahansa nahay in macluumaadkayga shakhsiyeed uu hoos imanayo ilaalinta arimahayga gaarka, faahfaahintu waxay ku jirtaa qoraalkeena ururinta ee www.srcentre.com.au/rentersurvey/info.



OFFICIAL: Sensitive